


# Siyaasadda ciyaartoyga

Naadiga Dhalinyarada Enköpings SK

**2025-11-25**

# Ku soo dhawoow Naadiga Dhalinyarada Enköpings SK!

Waxaan rajenaynaa in adiga iyo ilmahaagu aad ka heli doontaan ururkeena. Hawlaha naadigu waxay ku salaysan yihiin midnimo, farxad, ka qaybgal iyo mas'uulyad. Naadiga Dhalliyarada Enköpings SK hadafkiisu waa in dhammaan xubnaha firfircoon ay ku faraxsan yihiin tababarrada, ciyaaraha iyo waxqabadyada kale. Waxaan aad u jeclaan lahayn inay carruurta ka sokow kubbadda cagta ay xataa ka qaybgalaan cayaaro kale.
Naadiga Dhallinyarada Enköpings SK wuxuu abaabulaa kubbadda cagta carruurta iyo dhallinyarada loogu talogalay gabdhaha iyo wiilasha, kubbadda cagta dumarka waayeelka ah iyo kubadda cagta dadka naafada ah.

**Hawlahayaga waxaa naga caawima dad waaweyn aan faa'iido doon ahayn oo xilligooda firaaqada ah doorbida inay gacan muhiim ah ka gaystaan hawlaha kala duwan ee kooxaheena iyo/ama ururka sidiisa kale**.
Ciyaartoydeena firfircoon waxay ku tiirsan yihiin dadaalka dadka aan faa'do doonka ahayn, kuwaas oo suurageliya in ururka laga heli karo waxqabadyo xiiso, aqoon kororsi iyo amni leh. Waxaan iyana urur ahaan dooneynaa inaan gacan ka geysanno kaalin bulsho oo muhiim ah annagoo bixinna waxqabad xilli firaaqo ay firfircooni iyo midaysnaan ku dheehan yihiin. Qayb ahaan annagoo abaabulna waxbarasho kubbadda cagta ah oo tayo leh, qayb ahaanna annagoo barbaarinna muwaadiniin wanaagsan oo mustaqbal.

**Haddaad waalid u tahay ilmo xubin ka ah ururkayaga, iyadoon loo eegin inaad tahay ama aadan ahayn hoggamiye, waxaan doonaynaa inaad diyaar u tahay marka ururku ama kooxdu ay u baahdaan caawimo waxqabad ama dadaal. Waxaa taas u dheer oo aan doonaynaa inaad ka qaybgasho kooxda shirkeeda waalidiinta iyo waxqabdyada kale ee ay kooxdu leedahay.**

Naadiga Dhallinyarada Enköpings SK wuxuu u baahan yahay inay dad badan iska kaashadaan sidii lagu dardargelin lahaa inay waxqabdyo-maalmeedyadu ku socdaan hab culeyska uu qof kasta qaadayo uu u noqdo mid qof kasta macquul u ah. Sidaas darteed waalid ahaan waa inaad ogaataa **inay jiraan shuruudo** ku xiran in ilmahaagu uu u helo fursad uu kubadda cagta ugu ciyaaro Naadiga Dhallinyarada Enköpings SK. Kuwaas waxaad ka heleysaa qaybta **Waalid ahaan waa inaad**.

Xaaladaha uu ciyaartoy ama waalid ciyaartoy uu u hogaansami waayo shuruudaha ururka waxay cawaaqib u yeelanaysaa ciyaartoyga sida xannibaadyo ka dhan ah tababarrada, ciyaaraha iyo ka qaybgalka tartannada, markay ugu daran tahayna waxaa ciyaartoyga laga xiri karaa xubinnimada ururka. Taas waxay iyana jirtaa haddii la bixin waayo khidmadda ururka. Waa KHASAB in khidmadda wakhtigeeda lagu bixiyo.
Haddii ciyaartoyga maqnaanshihiisu uu badan yahay, uu ballamada imaan waayo ama maqnaanshaha la soo sheegi waayo, haddii waalidku uu ka qaybgali waayo tusaale ahaan wax iibinta ay go'aamiyeen ururka ama kooxda, waxay taasu keeneysaa in ilmaha laga saaro kooxda oo uu ka tago ururka.

Xubinnimada uururkeenna waxay la macno tahay in **dhammaan** habab kala duwan **gacan laga geysto hawlaha** ururka iyo in **la raaco qawaaniinta** iyo dokumentiyada siyaasadeed ee ururka.
**Naadiga Dhallinyarada Enköpings SK habayaraatee wax dulqaad ah uma laha cagajuglayn, isticmaal ereyo aflagaaddo ah sida ereyo jinsi, cay iwm ee ka dhan ah**

**asxaabta kooxda, kooxaha naga soo horjeeda, hoggaamiyeyaasha, garsoorayaasha iwm. Ciyaartoy ahaan** waa in la noqdaa tusaale wanaagsan oo ay ku daydaan dhallinyarada kale, xirashada summadda ESK waa inay wehliso xushmad marka la joogo tababar, ciyaaro iyo "magaalo". Xubin Naadiga Dhallinyarada ESK ahaan waa inaad had iyo jeer xushmad u muujisaa dadka kale iyo hantidooda/alaabtooda. Taasi waxay xataa khusaysaa shirkadaha iyo hay'adaha. Had iyo jeer xubin ahaan waxaad matalaysaa ururkayaga. Haddii qodobadaan loo hoggaansami waayo waxay keeni kartaa in lagaa xiro ururka.

Naadiga Dhallinyarada Enköpings SK waa urur ka madaxbannaan diin iyo siyaasad.

## Ciyaartoy ahaan waa inaad

- Ixtiraam u muujiso ururka, asxaabtaada, hoggaamiyeyaasha iyo ciyaartoyda naadiga. Waa inaad ixtiraam u muujisaa ciyaartoyda iyo hoggaamiyeyaasha kooxha naga soo horjeeda oo aad ula dhaqanto si edeb leh.
- Raacdo kooxda iyo ururka siyaasadahooda iyo qawaaniintooda.
- Saaxiib wanaagsan sidiisa u dhaqantaa xataa goobaha ka baxsan garoonka.
- Ilaalisaa wakhtiyada tababarrada, ciyaaraha iyo waxqabadyada kale.
- Ka qaygashaa kooxda tababarradeeda iyo waxbarashada kubbadda cagta ee uu naadigu bixiyo.
- Xushmaysaa go'aan garsoore xataa haddad u dareento inuu caddaalad darro yahay oo waa inaad noqotaa guuleyste iyo laga guuleyste wanaagsan.
- Ahaataa xubin Naadiga Dhallinyarada Enköpings SK – **taas oo ka dhigan inay tahay in wakhtigeeda lagyu bixiyo khidmadda xubinnimada iyo ka qaybgalka. Haddii taas la yeeli waayo waxaa lagaa joojinayaa ka qaybgalka tababarrada, ciyaaraha iwm.**

## Waalid ahaan waa inaad

- Akhrisataa siyaasadda, la wadaagtaa waxa halkaas ku qoran ilmahaaga. Dabadeed xaqiijisaa inaad akhriday Siyaasadda Ciyaartoyga adigoo saxiixa.
- ***Ka qaybgashaa shirarka waalidka ee ay abaabulaan ururka iyo kooxda.***
- ***Waa shardi inaad gacan ka geysato waxqabadyada wadajirka ah ee kooxda iyo ururka*.**
- Taageertaa oo u sacabtuntaa ciyaartoydeena iyo kooxdeena oo aadan marnaba faragelin ku samaynin tababarrada, xumaanna ka sheegin tababare, garsoore ama ka-soo-horjeede.
- Xil iska saartaa inaad si firfircoon Sportadmin iyo farriimaha la soo diro kala socoto oo ogaato arrimaha tababarrada, ciyaaraha iyo waxqabadyada kale.
- Ixtiraantaa wakhtiyada la isku yimaado ee tababarrada, ciyaaraha iyo waxqabadyada kale. **Macnihii waa inaad hubiso inuu ilmuhu wakhtigiisii ku yimaado tababarrada, ciyaaraha iwm.**
- Xil iska saartaa inaad ilamaha ku qorto ama ka saarto dhammaan waxqabadyada, wakhtigii loogu talogalay.

## Faahfaahin kale

Macluumaadka Naadiga Dhallinyarada Enköpings SK badankood waxaa laga helaa bogga Internetka (Sportadmin) iyo farriimaha la soo diro. Haddaadan hore taleefankaaga gacanta u soo dejisan barnaamijka Sportadmin, taas samee.
Si fudud ayaad markaa u arkaysaa macluumaadka khuseeya adigaiyo ilmahaaga. Hoggaamiyeyaasha ayaa caawimaad diyaar u ah! Haddaad qabto su'aalo ama walaacyo kale, had iyo jeer ku soo dhawoow inaad la xiriirto hoggaamiyeyaasha kooxda.
Weydiiso hoggaamiyeyaasha caawimaad ama la xiriir Sportadmin haddii aad dhibaato kala kulanto galitaanka bogga internetka/barnaamijka Sportadmin.